



Dayrta 2020: Fasalada Waxbarashadu waxay noqon doonaan Online Ilaa laga gaarayo bisha Noofeembar 5teeda

Luulyo 28, 2020

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Waxaan qoraalkani idinkula socodsiinayaa in qof waliba ogaado ka dib u eegistayadii tilmaamaha saraaakiisha caafimaadka waqtigan ugu wanaagsan ee diyaarka ah, iyo [wargalintii maanta ee Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown](#) kuna saabsan qiyaasaha caafimaad ee cusub iyo heerarka furitaanka iskuulada waxaanu go'aansanay in Dugsiyada Dadweynaha Portland dhammaan simistarka dayrta lagu bilaabi doono in lagu qaato waxbarashadii online, iyada oo la isticmaalayo qaabka waxbarashada masaafada ee guryaha ardaydu ku qaadaneysa oo dhammeystiran. Taasi oo macnaheedu yahay in **dhammaan ardayda PreK ilaa fasalada 12naad ay waxbarashadoodii ku qaadani doonaan qaab online ah ilaa bisha Sebtember 2deeda (maalinta ugu horeysa sanad-dugsiyeedka 2020-21 ee Dugsiyada Dadweynaha Portland) ilaa laga gaarayo bisha Noofeembar 5teeda, taasi oo ah marka uu dhammaanayo rubuca ugu horeysa sanad-dugsiyeedka.**

Waxaan qirayaa in dhammaantaan aad ka walaacsaneyn xog u noqoshada sida uu noqon doono sanad-dugsiyeedka cusubi, iyada oo ay tani tahay war ina siinayo waxoogaa dammaanad ah balse ay wali jiraan caqabado kale. Xilligii xaggaaga oo hadda ku dhow gabogabo, waxaan dhammaanteen rajeyneynay inay noqoto xaqiiqo taasi ka gedisan xanuunkani safmareenkani ah. Waxaan aaminsanahay inay tahay mas'uuliyad iyo fikir qoto dheer labadaba in aan go'aanadeena ku salayno fayo-qabka iyo caafimaadka ugu wanaagsan waxa uu noqon doono ardeydeena iyo shaqaalaha. Kuwayaga shaqadoodu tahay inay u addeegaan waxbarashada dadweynaha, waxaan sidoo kale doorbideynaa in ardaydeenu waxbarashadoodu ku qaataan qaabka waxbarasho ee fasalada dhexdooda, laakiin marka aad eegto xaaladaha waqtigan, waa mid aan nabadgelyo ahayn marka tiro arday iyo dad waaweyn oo shaqaalaha ah la iskuugu keeno dhismayaasha iskuulada waqtigani.

Waxaan suurtagal ah in ilaa COVID-19 xaaladiisu ay ka soo rayneysa waxbarashada online ee ardaydu guryaha ku qaadaneysa lagu kordhin doono rubuca labaad ee sanad-dugsiyeedka. Waxaan qiimeyn doono dhammaan caafimaadka dadweynaha ee la heli karo iyo qiyaasaha caafimaad ee degmooyinka, sidoo kale in aan si joogta ah ula tashano kooxaha la-taliyayaashada khabiirada ku ah caafimaadka sidii ay nooga caawin lahaayeen in go'aanka dib u furista iskuulada rubuca labaad ee sanad-dugsiyeedka. Waxaan idinla socodsiin doonaa qorshayaashayada ugu dambeyn bisha Oktoobar 10keeda. Ilaa iminka, waxbarashada ardaydu guryaha ku qaadaneysa oo dhammeystiran ayaa noqon doonto qaabka PPS ay waxbarashada u gaadhsiineysa dhammaan ardaydeeda ilaa laga gaadhayo ugu yaraan bisha Noofeembar 5teeda.

Macallin ahaan, waxaan ogsoonahay in ayna jirin wax lagu bedeli kari oo dhab ah waxbarashada macalinka iyo ardaygu ay fasal wada joogaan iyo isla falgalka ardayda iyo macalimiinta dadaalaya ama



xubnaha shaqaalaha. Laakiin wargalinteena maantu waa in mudnaanta koowaad aanu siino inta lagu jiro xaalada cudurka safmareenka ah caafimaadka iyo fayyo-qabka ardaydeena iyo shaqaalaheena. Waxa aanu ka mid noqoneynaa tirada isa soo tarayso dugsiyada degmada ee gobolka Oregon iyo wadanka Maraykan ay go'aansanayaan in ay sanad-dugsiyeedkani ku bilaabaysa qaabka ah in ay ardaydu waxbarashadoodii ku qaataan guryaha.

Marka aad eegto waxa uu yahay waxbarasho dhammeystiran oo masaafada guryaha lagu qaadanayo waxa ay uga dhigan tahay ardayda PPS, waa in aad ogaato in qaabkani loogu talagalay in uu ka duwanaado qaabkii hore ee ay ardaydeenu wax u soo barten xilligii gu'ga. Himiladayadu waxa ay tahay in aan diyaar u nahay sidii aan ardayda u siin lahayn waxbarasho macno u sameyneysa xilliga dayrta. Waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan su'aalaha sida joogtada ah la isku weydiiyo qeybta ugu dambeysa ee fariinta, iyada oo aan idinla wadaagi doono faahfaahino dheeraad ah maalmaha iyo todobaadada soo socda.

Inta lagu gudo jiro todobaadka ugu horeeya iskuulka, waxa aad ka rajeyneysaa ilmihiiina sidii ay ugu xirmi lahaayeen macalimiinta iyo ardayda fasaladooda, sidii ay u noqon lahaayeen kuwo u soo jeeda qaabka waxbarashada loo qaadanayo iyaga oo ka qeybqaadanaya hawlaha lagu taageerayo baahiyaha shucuurtooda bulsho. Ka gadaal labada todobaad ugu horeeya, ardaydu waxa ay raaci doonaa jadwalkoodii caadiga ahaa ee todobaadlaha ahaa iyada oo ay yeelan doonaa maalin walba xiriir macalimiintooda. Dhibcaha imtixaanada waa la siin doonaa iyada oo sidoo kalena soo xadiristoodana la qaadi doono fasalada.

Inkastoo tani ay noqon doonto bilow aan caadi ahayn marka aad eegto sanad-dugsiyeedkani, waxa aan ka shaqeyneynaa anaka oo dadaaleyna sidii aan u abuuri lahayn fursado cusub, iyada oo la dhisayo taageerida qaab lagu xaqiijinayo ardaydeena madow, Asalka Maraykanka ah iyo ardayda aan cadaanka ahayn sidii ay u heli lahaayeen taageero gaara oo dhinaca dhaqankooda ah. Kuwaasi waxaa ka mid ah sii wadista in la xoojiyo iskaashiga lala sameynayo ku salaysan dhaqanka bulshadeena, sii wadista sidii loo yareyn lahaa sinaan la'aanshaha dhinaca jinsiyadaheena iyo istaraatiyadaha cadaalada bulshada waxbarashadeena iyo horumarinta taageerida shucuurta bulshada oo ka bilaabanta sidii wax looga qaban lahaa raadka ay waqtiyadani ay ku yeelatay caafimaadka maskaxda.

Qoysaska iyo shaqaaluhu waxa aad naga sugtaan waa wargalin dheeraad ah iyo macluumaad ka hor inta aanu sanad-dugsiyeedku bilaabmin. Kooxdayadu waxa aan si hagar la'aan uga shaqeyneynaa sidii aan waqtigani kala guurka uga dhigi lahayn si dhib yar u suurtagala waxbarashada dhammeystiran ee guryaha ardaydu ku qaadan doonto. Todobaadka soo socda waxaad heli doontaan xog dheeraad ah oo sooyaalka ee agabka qalabkeena teknoolajiga cusub aan isticmaali doono.

Fadlan waxaad la socotaa si joogta inaad qolka fariimuhu ku soo dhacaan ee email-kiina ka hubisaan idinka oo booqanaya pps.net/fall2020 wixii macluumaad ah ee ugu dambeeyey bilowga sanad-dugsiyeedka. Waxaad sidoo kale caawa daawan kartaa kulanka Golaha Waxbarashada ee shaqo oo bilaabmaya 6:00 galabnimo, halkaasi oo ay shaqaaluhu soo bandhigi doonaan wararkii ugu dambeeyey sidii caadiga ahayd idinka oo [gujinaya halkankani](#).



Waqti ayay qaadan doonta inta ay ardaydu ku soo noqon doonaan iskuuladoodii, laakiin caafimaadka iyo fayo-qabka caruurteena, dhallinyaradedena, iyo shaqaalaheena ayaa mudnaanta koowaad siineynaa. Waxa nasiib wanaag noo ah in aan leenahay shaqaale na taageeraya, hoggaamiyaal bulsho, madax la doorto, iyo saraakiil caafimaad oo ka shaqeynaya sidii ay noola shaqeyn lahaayeen tallaabo kasta oo aan qaadaneyno. Taasina waa mid aan si wada jir iyada oo nooga go'an u qabaneyno wax kasta oo aanu idinku taageereyno, ardaydiina, iyo dadaalka ay muujinayaa macalimiinteen u iyo abuuritaanka aan ku tiirsan nahay sidii ay waxbarashada masaafada ee guryaha ay ardaydu ku qaadaneyso u noqon lahayd mid leh natiijo togan arday kasta oo ka mid ah ardayda. Marka ay timaado in caafimaadka hagaago sida ugu dhakhso badan, waxa aynu mar labaad furi doonaa iridaha fasalada si ay ardaydu ugu soo noqdaan iskuuladoodii, laakiin waqtigani, waxa aan rajeyneynaa in aan aragno ardaydeena oo wax barta si wada jir ahna u koraya, muuqaal ahaan.

Sincerely,

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada